

Fasallo dadka lagu baro akhriska iyo qoraalka

Barashada luqadda Ingiriiska oo loo barto luqad labaad ahaan waxay qayb muhim ah ka tahay hab dhaqan cusub oo lagu guulaysto. Inkastoo barashada luqad cusub ay tahay wax dhib badan, haddana waxa jira casharro af ingiriis ah oo lacag la'aan ah oo ka socda dhawr meelood oo ku dhextaal jaaliyadaha. Dhammaan xarumahaas waxaa ka socda casharro la dhigo subaxdii, galabtii iyo habeenkii oo kaad doontid isku qori kartid. Waxaad is-diiwaan gelin karta waqti kasta oo aad adigu rabtid inta sanadka waxbarshadu socdo. Xarumaha hoos ku xusan mid ka mid ah tag oo iska-diiwaan geli. Macalin baa qiyaasaya heerka aad ka gaartay barashada luqadda Ingiriiska kadibna wuxuu kugu darayaa fasalka aad la socon kartid. Waxaa kalee jira fasallo afka Ingiriisiga lagu barto oo loogu talo galay dadka da'da weyn iyo dadka caawimaad gaar ah u baahan sida kuwa aan si fiican indhaha wax uga arki karin. Weliba waxaa kalee jira fasallo dadka lagu baro luqadda Ingiriisiga oo la xiriira shaqada.



Barnaamijka wax Akhriska

Waxaa jira barnaamij wax akhris oo maktabadaha San Diego ka socda oo dadka lagu baro luqadda Ingiriisiga oo lacag la'aan ah. Waxaa kalee jira adeeg waxbarasho oo loogu talo galay dadka da'doodu tahay 18 jir iyo wixii ka sii weyn. Casharada waxaa dhiga dad waxbarista dhab ahaan u yaqaan oo khibrad u leh. Waxaa kalee ka qayb qaata dad iska wax- u -qabso ku shaqeeya oo ka kala socda dugsiyada dadka weyn ee degmada iyo koolejyada dadweynaha iyo hayadaha waxbarashada ee qaata ardayda loo diro. Sanad kasta wuxuu barnaamijkani gacan taageero u fidiyaa in ka badan 1000 arday oo ah dad da'weyn oo ka soo jeeda asallo kala duwan oo gaaray heerar waxbarasho oo kala duwan. Haddaad u baahan tahay faaf faahin, wac ama la xiriir

READ/SAN DIEGO

5148 Market St.
San Diego, CA 92114-2209
phone: (619) 527-5475
Email: readstaff@sandiego.gov

Waxbarashada Dadka Waaweyn

Isla xarumahaas kor qoran waxay kalee bixiyaan koorosyo waxbarasho oo u gaar ah dadka waaweyn. Fasallada intooda badani waa lacag la'aan. Is-diiwaan gelintuna way furan tahay. Waxaa jira in ka badan kun kooros oo aad kala dooran kartid oo laga helo 386 meelood oo jaaliyaduhu deggan yihiin. Fasalladaas waxaa ka mid ah tacliinta asaasiga ah ee dadka waaweyn, farshaxanka, gaanacsiga, xirfadaha, muwaadinnimada, kumbuyuutarka, cunto kariska, afafka qalaad ama afafka ajnebiga, waxyaabaha xiisaha leh, muusik, xannaanada carruurta iyo jir dhiska.